



## XOG KU SAABSAN Talaalka mRNA

### DULMARKA

#### Dadaalkeena

Talaalka COVID waa talaalka messenger – RNA (mRNA). Marka lagugu duro, waxa uu keenaa in jirkaagu abuuro koobiyada "unugyada" fayraska COVID. Unugyadaan waxay ka samaysan yihiin barootiin waana qayb aad u yar oo kamid ah dusha sare ee fayraska COVID, mana ahan fayraska oo dhan. Kuuro yar ayaa ku filan inay kiciso nidaamka difaaca jirka kaasoo kaa difaacaaya qaadista cudurka COVID haddii la joogto qof fayraska qaba mustaqbalka.

- Si lamid ah dhammaan talaallada, talaalada mRNA ee COVID-19 waa laga baaray badqabka kahor intaan loo ogolaan in lagu isticmaalo Maraykanka.
- Tignoolooyiyada mRNA waa mid cusub, laakiin maaha wax aan horay loo aqoon. Waxaa daraasad lagu waday in ka badan toban sano.
- Talaallada mRNA kuma jiro fayras nool mana lahan khatar keenaysa cudur ku dhacaaya qofka la talaalay.
- mRNA ee ku jira talaalku marna ma galaayo ubucda unugta saameynta kuma lahan mana faragashanaayo DNA ga qofka.

### SIDA AY U SHAQAYSO

mRNA ayaa sida ugu fudud lagu qeexi karaa tilmaamo u sheegaaya unugta jirka sida loo sameeyo cad "barootiinka difaaca ah" oo gaar u ah SARS-CoV-2.

Maadaama kaliya qayb kamid ah barootiinka la sameeyay, wax dhibaato ah kuma ahan qofka la talaalay laakiin waa difaac - macnaheeduna yahay inay tahay unug difaac oo fayraska la dagaalaysa.

Kadib marka cadka barootiinka difaaca ah la sameeyo, unugta ayaa burburinaysa madaxyada mRNA kadibna dhalaalinaysa ayadoo adeegsanaysa gubayaasha ku jira xubinta. Waa muhiim inaad ogaato in madaxyada mRNA aysan marna galayn ubucda xubinta ama saamayn ku lahayn maadooyinka hide sidayaasha ah. Xogtaan ayaa kaa caawinaysaa kahortaga xogta beenta ah ee ku saabsan sida talaallada mRNA ay u badelaan ama wax uga badalaan qaab dhismeedka hide sidayaasha qofka.

Marka lagusoo bandhigo dusha unugya, barootiinka ama difaaca ayaa ku qasbaaya nidaamka difaaca inuu bilaabo saamaynta difaacyada jirka uuna kiciyo unugyada T si ay ula dagaalaan waxa ay u aragto caabuq. Difaacyadaan jirka ayaa qaas u ah SARS-CoV-2, taasoo ka dhigan in nidaamka difaaca loo sheegaayo inuu ka hortago caabuqu inuu qofka mustaqbalka ku dhaco.

### BADQABKA

**Talaallada mRNA ee COVID-19 waxay marayaan isla qiimaynta adag ee badqabka ee ay mareen dhammaan talaalladii ka horeeyay kahor intaysan oggolaan in lagu isticmaalo Maraykanka**

**Maamulka Cuntada iyo Daawada.** Tan waxaa ku jira tijaabooyin waawayn ee caafimaadka iyo dib u eegista xogta oo ay sameeyeen gudigga la socoshada badqabka.

Inta badan bukaannadu waxay ka walaacsan yihiin talaallada fayraska nool ku jiro. Talaallada mRNA maana talaallo noole laga sameeyay mana adeegsadaan waxyaabo caabuq ah, **marka ma sidaan wax khatar ah oo keenaysa cudur ku dhaca qofka la talaalay.**